

F A A F I N
الرسـمـيـة



R A S M I A H
الجـرـيدـة

EE JAMHURIADDA DIMUQRADIGA SOMALIYA
لـجـمـهـورـيـة الصـوـمـالـ الـدـيمـقـراـطـيـة

Sannadka 3aad Muqdisho, 14 Febbrayo 1975 L. 1 R. 2bis

Laanta Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada Golaha Sare ee Kacaanka

FAAFIN BIL SOO BAXA

جريدة شـهـرـية

QIIMADU: waa 5 shilin lambar waliba — RUKUNKA: Sanadii waa Sh. 100 Samaliya gudeheeda — dibaddedana waa Shs. 300. Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyay wuxuu ka bilabmaa 1 Janayo. Qiimaha qoritaanku F. R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba shilin — Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah — Lacagta waxaa lagu bixinayaan Xafiska Canshuraha ee Wasaaradda Lacagta

KOOBNIIN

BOGGA KOWAAD

SHARCI

SHARCI L. 14 ee 4 Febbrayo 1975, — *Dacwadcha Dawladda dhinac ka tahay.* Bog. 79 bis

BOGGA LABAAD

XEER

W. M.

BOGGA SEDDEXAAD

W. M.

TALOOYIN, ISGAARSIIN, OGEYSIIS, IYO WIXII LA MID AH

• 18. 2.

• 19. 2.

• 20. 2.

• 21. 2.

SHARCI L. 14 Tr. 4 Febrayo 1975.

Dacwadaha Dawladdo dhinac ka tahay.

GUDDOONMIYAH
GOLAHA SARE EE KACAANKA

ISAGOO ARKAY Xaashidi 1aad iyo tan 2aad ee Kacaankii 21
Oktoobar 1969;

ISAGOO AQOONSADAY Baahida loo qabo dacwooyinka Dawladdo dhinac ka tahay loo wareejiyo Maxkamadda Badbaadada Dalka;

ISAGOO TIXGELIYEY Go'aankii ka soo baxay Golaha Sare ee Kacaanka iyo Golaha Xoghayayaasha Dawladda;

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda :-

Qod. 1aad

Dacwadaha madangia ah iyo kuwa idaariga ah (Civil and Administrative Cases) ee Dawladdu dhinac ka tahay waxa awood loo siiyey Maxkamadda Badbaadada Dalka, oo keli ah.

Qod. 2aad

Dacwadaha lagu tilmaamay qod. 1aad, ee hadda la yaalla (Pending) Maxkamadaha Caadiga ah ama looga qaataay Racfaan Maxkamadaha Sare, waa in loo wareejiyo Maxkamadda Badbaadada Dalka, laga bilaabo marku sharcigani hirgalo.

Qod. 3aad

i) Dacwadaha Dawladdu dhinac ka tahay waxa qura oo daafici kara Garyaqanka Guud ee Dawladda oo loo xilsaaray inuu ilaaliyo dan ta Dawladda;

ii) Lama oggola, hadda wixii ka dambeeya in cid 'kale daafacdo ama Maxkamadda horteeda uga doodo Wasaaradaha, Wakaaladaha, Xubnaha kale ee Dawladda, iyo Shirkadaha iyo Mashaariicda Dowladda Soomaaliya qaybta ku leedahay.

Qod. 4aad

Sharcigani wuxuu dhaqan galayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha G.S.K. waxaana lagu soo saari doonaa faafinta Rasmiga ah ee Dowladda.

Muqdisho, 4 Febrayo 1975.

GUDDOONSHAH
GOLAHA SARE EE KACAANKA
Jaalle (S/Gaas Maxamed Siyaad Barre)